

# SHAQO

## Raadiyeyaasha...



Ma u baahan tahay shaqo?

*CareerCenter waa meesha aad shaqo raadinta ka billaabayo!*



Ma u baahan tahay xirfado la cusboonaysiiyay ama shahaado?

*Shabakadda la-hawlgalayaashayada ayaa ku caawin karta!*

Ma tahay halyeey?

*Halyeeyada waxay leeyihiiin mudnaanta u adeegidda ee dhammaan CareerCenters.*



### Hordhac:

CareerCenter waa meesha laga billaabo markaad raadinayso shaqadaada ugu horreysa, shaqo ka wanaagsan taada - ama xirfad cusub aad billaabayo. Sidoo kale waa meesha laga helo macluumaadka ku saabsan tababarka iyo waxbarashada foolka-foolka ah ama onlaynka ah. CareerCenters waxay qabataa bandhigyo shaqo iyo munaasabado shaqaaleysiin maalin kasta.

### Adeegyada CareerCenter

#### Caawimaadda Shaqo Raadinta:

CareerCenters waxay bixisa liisyoo shaqo oo kala duwan oo ka kala yimid dhammaan gobolka Maine. Maine JobLink waxay ku siin doontaa fursad aad ku hesho kumannaan shaqo oo furan waxayna kugu aaddin doontaa shaqooyinka aad raadinayso.



#### Xarunta Macluumaadka:

Xarumaha Macluumaadka ee CareerCenter waxay bixiyaan helitaanka qalab shaqo raadin aad iskoo ugu qabsato oo kala duwan— oo dhammaan kharash la'aan ah! Taleefannada, kombuyutarrada, iyo koobiyeeyaaasha ayaa la heli karaa si ay kaaga caawiyaan shaqo raadinta, iyo sidoo kale macluumaadka iyo gelitaanka shabakadayada wada-hawlgalayaasha gobolka oo dhan

#### Aqoon-is-weydaarsiyo:

Xarumaha CareerCenters waxay bixiyaan aqoon-is-weydaarsiyo badan oo bilaash ah. La xiriir xafiiska deegaankaaga maanta, ama booqo mareegahayaga si aad u aragto aqoon-is-weydaarsiyada la bixinayo.

#### Halyeeyada:

Ma tahay halyeey? Adeegyada Halyeeyga ayaa laga heli karaa dhammaan nidaamka CareerCenter ee Gobolka.

#### Tababarka Xirfadaha Shaqo:

CareerCenters waxay siisaa kaalmo tababar macaamiisha buuxiya shuruudaha u-qalmitaanka qaarkood. Caawinta kharashka tababarka iyo sidoo kale adeegyada taageerada ayaa laga yaabaa in la helo.



#### Maine CareerCenters

www.mainecareercenter.gov

MaineDOL.CareerCenter@maine.gov

207-623-7981 | Istimailayaasha TTY wac Gudbinta Maine 711



MAINE  
DEPARTMENT OF  
LABOR

Waaxda Shaqada ee Maine waxay bixisa fursad loo siman yahay ee xagga shaqada iyo barnaamijyada. Kaalmada iyo adeegyada dheeraadka ah ayaa loo heli karaa dadka naafada ah haddii la codsado.